



## Dugsiyada Magaalada Columbus, waxaynu nahay **BADBAADIYAYAAL**.

**Waxaan nahay badbaadiyayaal marka aynu wada shaqeyno si aan mudnaanta u siinno horumarinta ammaanka, si aan isu wada ilaalino, iyo marka aan ka wada hadalayno baahida loo qabo in la dhammeeyo rabshadaha hubka.**

Guddiga Waxbarashada Magaalada Columbus iyo hoggaamiyeyaasha Degmadu waxaa naga wada go'an in aan sameeyno wax kasta oo aan awoodno si aan u ilaalino nabad-gelyada ardayda iyo shaqaalahaba. Maha qofna in uu ka baqo inuu yimaado dugsiga si uu wax u barto ama u shaqeeyo ama u hubiyo ilmihisa. Weli, fasal walba iyo dhisme kasta - oo laga yaabo xitaa qoyskaagaaga - dhacdooyinka naxdinta leh ee ka dhacay Florida ayaa kor u qaaday walaac kasta oo aan qabno kuna saabsan ammaanka dugsiga.

Anagu waa inaan **WADA NOQONNAA BADBAADIYAYAAL**, waxannu dooneynaa in aan caawino dhammaan ardayda, qoysaska, shaqaalaha, dar-yeelayaasha dadka qaan-gaarka ah, iyo wada-hawl-galayaasha beesha. Waxaan rabnaa inaad ogaato in ay:

- **Dugsiyada Magaalada Columbus waxay leeyihiin Nidaam aan u-Dul-qaadasho ulahayn in hub la haysto.** Ardaydu waxay la kulmi doonaan tallaabooyin edbin ah, oo ay ku jirto suurta galnimada ka-hakinta ama ka-eryidda dugsiga, haddii lagu helo inay haystaan shay kasta oo loo arko inay khatar ugu yihiin naftooda ama kuwa kale ee ku nool deegaan dugsiga.
- Cawaaqibta haysashada hubka ka baxsan iskuulku waxay noqon kartaa mid aad u daran. Hadday tahay xaafadda ama guriga, dhalinyaradu waxay u baahan yihiin inay fahmaan khatarta haysashada hubka, hubka korontada ka samaysan, ama nooc kale oo hub ah. **Waxaan uga baahannahay qoysaska in ay kala sheekeeystaan fikarado dhaxal gala oo ah dhibaatooyinka hubka.** Taas waxaa ka mid ah digniino ku saabsan qorista faallooyinka ama sawirada la xiriira qoryaha ama rabshadaha xisaabaadka warbaahinta bulshada.
- **Badbaadadu waa arrin aad u culus.** Dhammaan hanjabaadaha ammaanka dugsiga ayaa si dhab ah loo qaadanayaa, haddii lagu sameeyo warbaahinta bulshada, meel dad badan, telefoon ama qoraal, ama xitaa sida kaftan ah. Booliiska Columbus iyo kooxaheenna nabad-gelyada & Amniga waxay si deg deg ah u baarayaan hanjabaad kasta waxaan ognahay in aan si degdeg ah wax uga qabanayno kuwa sameeya khatarta. Ardaydu waxay u baahan yihiin inay ogaadaan in la xisaabtami doono, xitaa haddii hanjabaadda ay sameeyeen aysan ahayn mid dhab ah.
- **Wacyigelinta amniga ayaa kor loo qaaday dhismaha kasta ee Dugsiyada Magaalada Columbus CCS sida taxadar leh.** Macallimiinta iyo maamulayaasha dugsiyada oo idil waxay qaadanayaan wakhti ay kula hadlaan ardayda oo ku saabsan muhiimadda amniga. Waxaa la xoojiyay adkaynta nabad-gelyada joogitaanka ammaanka ayaa la kordhiyay sidoo kale ilaalinta dhismayaal badan. Dadka soo booqanaya waxay u badan tahay inay la kulmaan baaritaan dheeraad ah ka hor inta aan loo oggolaan inay galaan dhismayaasha.
- Haddii **aad wax aragto, Waa inaad waxa sheegtaa.** Mid ka mid ah ilaha nabad-gelyada ugu weyn ee Degmada waa xiriirka kalsoonida ee laga dhax dhisay ardayda, qoysaska, shaqaalaha, iyo kooxaha amniga. Tani way ka badan tahay ka warbixinta hubka ama dagaallada; waxay dhiiri-gelineysaa ardaydu hadlaan mar kasta oo ay arkaan arday kale oo ka baxsan noocyada kala duwan ama si joogto u ah kali ahaan.
- Waxaan dhiirigelineynaa cid kasta oo ku xiran Dugsiyada Magaalada Columbus "Wax fiiri, Waxaad sheegtaa wax" adoo wacaya ama qoraya khadadkeena qarsoodiga ah **844-SAFER-OH** haddii aad ka warqabto khatar ka iman karta mid ka mid ah ardaydeena ama dugsiyadeena.

**Badbaadadu waa mudnaanta ugu weyn ee aan ka sameyno Dugsiyada Magaalada Columbus.** Maamulayaasha iyo kooxaha nabad-gelyada waxay sii wadi doonaan inay cusbooneysiyaan mar kasta oo wal-walka ammaanku uu saameyn ku yeelan karo jawiga waxbarasho ee dhismayaasheenna. Waannu kuugu mahad-naqaynaa sii wadista taageeradooda shaqado iyo bulshadeenna dugsiga. Run ahaantii waxaannu nahay dhammaanteen bad-baadiyayaal!

**SPEAK UP  
SAVE LIVES**

TEXT or CALL:  
**844-SAFER-OH**  
844-723-3764

 **COLUMBUS  
CITY SCHOOLS**  
**#SAFERTOGETHER**